GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND
SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES







# Warbixinta

## Wax-qabadka Kal-fadhigii 3aad ee Golaha Wakiillada

*07 May 2022 illaa 07 July 202*

***September 2022***

## TUSMADA WARBIXINTA

HORDHAC ........ 4
WAX-QABADKA KAL-FADHIGII 3AAD ........ 5
Warbixinadii Golewaynaha laga hor akhirayay ........ 5
Mashaariicdii Sharci ee Goluhu Ansixiyay ........ 5
Masuuliyiintii Qaran ee Xilalkooda Goluhu Ansixiyay ........ 5
Mashaariicda Sharci ee Golaha horyaal ........ 7
WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA ........ 8
Gudidda Joogtada iyo Anshaxa ........ 8
Gudidda Daba-galka iyo Illaalinta Hantida Qaranka ........ 9
Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka ........ 10
Guddida Arr. Dibadda, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga ........ 10
Gudiyadii Gaarka ahaa Kal-fadhigii 2aad la saaray ........ 10
WAX-QABADKA QAYBTA MAAMULKA ........ 12
Aqoon-korodhsiyadii loo Qabtay Mudanayaasha & Shaqaalaha ........ 12
SAFARADII DALKA DIBADDIISA ........ 12
WUFUUDIHII IYO MADAXDII KALE EE GOLUHU LA KULMAY ........ 13

# ARRAAR

*Mudanayaal.*

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan kal-fadhigan 4aad ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore oo aanu Goluhu Shaqooyin badan qaban, isla markaana ajandaha kal-fadhigii hore intiisii badnayd isagoon dhamaan kal-fadhigu xidhmay.

Hadaba, si aynu u gudano Waajibaadkeena yo hawlaha faraha badan ee inoo qorshaysan kal-fadhigan darteed waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadkii kal-fadhigii 3aad ee Golaha iyo wixii kale ee hawlo ah ama dhacdooyin ahaa ee mudaddii fasaxa ee ka dambeysay kal-fadhigaas.

## HORDHAC

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Saddexda tiir ee Qaranku ku qotomo, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Legislation).

Golaha wakiilladu waa mid ka mida ah labada aqal ee Baarlamaanka Somaliland ka kooban yahay, kuwaas oo kala ah (Guurtida iyo Golaha Wakiillada) oo marka la isku darro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan. Golahan Wakiillada ee la soo doortay 31 May 2021 waa Golihii labaad ee ku yimaada qaab doorasho toos ah, waana Golihii 5$^{aad}$ (afraad) oo ay ka horeeyeen afar gole, saddexda gole ee kale waxay ku yimaadeen hab-beeleed (xulasho). Afartaas Gole ee Golahan ka horeeyay waxay kala ahaayeen: -

- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay shirweynihii Burco **1991 - 1993** kana koobnaa **(111)** xubnood.
- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Boorama **1993-1997** kana koobnaa **(75)** xubnood.
- Golihii wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Hargeysa **1997-2005** kana koobnaa **(82)** xubnood.
- Golihii wakiilada ugu horeeyay shacabku si toos ah u soo doorto September 2005kii, **2005-2021** kana koobnaa **(82)** xubnood.

Golaha Wakiillada waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoododu waa Xubno ka wakiil ah dadweynaha, waana qeybta 1$^{aad}$ ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Illaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo saarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka 39$^{aad}$, Qodobka 53$^{aad}$, Qodobka 54$^{aad}$ iyo Qodobka 55$^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Qaab-dhismeed-ka guud ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxa u dheer inuu leeyahay Guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan, waxanay ka kooban yihiin 10 Guddi Sida ku cad Xeer-hoosaadka Golaha Xeer Lr. 01/2021. Goluhu wuxuu yeeshay kal-fadhigii 3aad mudaddii u dhexaysay 07 May 2022 illaa 07 July 2022, kal-fadhigaas oo ahaa kal-fadhigii horeeyay ee Golahan 5aad ee Wakiillada Somaliland. Hadaba warbixintan waxaynu ku soo koobaynaa Wax-qabadkii Golaha ee Kal-fadhigaas 3aad iyo mudaddii fasaxa ee ka dambeysay wixii uu qabtay.

# WAX-QABADKA KAL-FADHIGII 3AAD

***Wax-qabadkA Kal-fadhigii 3aad ee Golaha Wakiillada***

| | | |
|---|---|---|
| 1. | **Fadhiyadii Golaweynaha ee Kal-fadhigii 3aad** | **23Fadhi** |
| 2. | Kulamadii Gudiyada Golaha Wakiiladu yeesheeyn | 29 Kulan |
| 3. | Isugaynta Fadhiyada iyo Kulamadii Gudiyada | 52 Fadhi/kulan |

## Warbixinadii Golewaynaha laga hor akhirayay

| Taariikhda | Nooca Warbixinta | Cidii akhridey |
|---|---|---|
| 15 May 2022 | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 1aad | Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle Xoghayaha Guud ee Golaha |
| 15 May 2022 | Warbixinta Kal-fadhiga 2aad ee Gudidda Joogta iyo Anshaxa | Md. Axmed Cabdi Casoowe Gud. Ku-xigeenka Gud. Joogtada |
| 12 June 2022 | Warbixinta Guddida Dhaqaalaha ee Wax-ka-beddelka Xeerka dakhliga Cashuuraha Bariga. | Md. Axmed Maxmamed Hurre (Barkhad) Gud. Ku-xigeenka Gud. Joogtada |
| 11 June 2022 | Warbixinta Wasaarada Gaashaandhiga iyo Ciidanka Qaranka | Wasiirka Wasaarada Gaashaandhiga iyo Taliyayaasha Ciidanka Qaranka |
| 19 June 2022 | Warbixinta Wasaarada Qorshaynta Qaranka | Md. Cumar Wasiirkii hore ee Wasaarada Qorshaynta |
| 19 June 2022 | Warbixinta Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta Sare | Md. Axmed Toronto Wasiirka Wasaarada Waxbarashada |

## Mashaariicdii Sharci ee Goluhu Ansixiyay

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeerka Xakameynta ka Ganacsiga iyo Tahriibka Dadka | 05/06/2022 | Madaxweynaha |

## Masuuliyiintii Qaran ee Xilalkooda Goluhu Ansixiyay

| No | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Maxamed Xasan Ismaciil | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 2. | Muxiyadii Yuusuf Ibraahim | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 3. | Aadan Geedi Qayaad | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 4. | Cabdale Ibraahim Maxamed | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 23/05/2022 |
| 5. | Mukhtaar Cabdi Jaamac | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |
| 6. | Siciid Maxamed Cilmi | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 7. | Maxamuud Axmed Obsiiye | Xubin Gudidda Diiwaangalinta Ururada | 06/06/2022 |
| 8. | Cabdirisaaq Ibraahim Maxamed | Wasiirka W. H. Jidadka iyo Gaadiidka | 13/06/2022 |
| 9. | Xuseen Cabdi Badhaani | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 10. | Ibraahim Aadan Cali | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 11. | Faadumo Ismaaciil Cabdi | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |
| 12. | Cabdicasiis Xiris Warsame | Xubin Gudidda Doorashooyinka | 20/06/2022 |

## Mashaariicda Sharci ee Golaha horyaal

### B. Mashaariicda ee Gudiyaddu gacanta ku hayaan

| No | Magaca Xeerka | Gudidda gacanta ku heysa |
|---|---|---|
| **1.** | Mashruuc Sharciga Maamulka Macdanta Qaranka | Gudiddda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah |
| **2.** | Mashruuc Sharciga  Dakhliga Shidaalka | Gudiddda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah |
| **3.** | Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Maamulka iyo Maaraynta Maaliyada | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| **4.** | Xeerka Hay'adda Qaxootiga iyo Magan-galyo doonka | Gudidda Shuruucda iyo Cadaalada |
| **5.** | Mashruuc Sharciga Jidaynta kabka H. Gobolada Barri iyo Nidaaminta Cashuuraha Dawladda dhexe u qabato dawldaha hoose | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| **6.** | Mashruuc Sharciga Caasimada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| **7.** | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Duulista Hawada | Gudidda Hawlaha Guud |

### T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Caruuraha | Guurtida ka soo noqday |
| 2. | Xeerka Shirkadaha Caymiska Qaranka | Gudi gaar ah loo saaray |
| 3. | Wax ka badalka Xeerka Cashuuraha Bariga | Gudi gaar ah loo saaray |

# WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka, Kheyraadka Dabiiciga, wax soo saarka iyo Tamarta
4. Gudidda Arrimaha Bulshada
5. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska
6. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
7. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta iyo Maal-gashiga
8. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca
9. Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Technologyada
10. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay Golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan. Hadaba, iyadoo Gudi waliba Warbixineeda Golaha ka hor akhrin doonta waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii Gudiyada oo kooban.

## Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Sida uu waajibinayo Dastuurka Qaranku iyo Xeer hoosaadka Golaha Wakiiladdu waxay Guddida Joogtada iyo Anshaxu hawlaha Golaha sii wadaan muddada uu Goluhu fasaxa ku jiro. Guddida Joogtadu iyo anshaxu iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga ah. Iyadoo ka duulaysa Xeer-hoosaadka Golaha Wakiiladda.

**1. Xog ururinta & kuur-galida khasaarihii ka dhashay Banaan-bixii 11 August: -**

Muddadii lagu jiray fasaxa Kal-Fadhigii 3aad waxay Gudiddu xog ururin iyo xaqiiqo raadin ku samaysay dhibaatadii khasaaraha dhimashada iyo dhaawaca sababtay ee ka dhalatay **Banaan-bixi 11 August** dalka ka dhacay gaar ahaan Magaalooyinka Hargeysa, Burco iyo Ceergaab.

Xogta rasmiga ah ee khasaaraha ka dhashay banaan-baxaas si ay gudiddu u hesho, waxay ugu horeyn kulamo kala duwan la yeelatay Madaxda dalka sida Wasiirka Arrimaha Gudaha, Taliyaha Ciidanka Bilayska iyo Xisbiyada Mucaaradka, ka dibn, Gudiddu waxay isu-qaybisay laba qaybood, mid ka mid ahi u baxday Gobolada Tog-dheer iyo Sanaag, halka qaybta kalena Hargeysa ka bilawday shaqo xog ururin, waxayna kormeero, booqasho iyo kulamo kala duwan la yeelatay Dhakhaatiirka saddexdaas Magaalo, dadkii dhaawacu soo gaadhay iyo ehelada dadkii ku naf-waayay, waxayna Gudiddu warbixin arrintaas ku saabsan Golewaynaha ka siinaysaa isla fadhiga.

**2. Masuuliyiintii Gudiddu la kulan tahay Mudadii Fasax lagu jiray:-**

Guddida Joogtada iyo Anshaxu iyagoo og muhiimadda Qaran ee ay u hayaan Wasaaradaha Iyo Hay'adaha Madax-Banaan ee Dawlada, Waxa ay Mudanayaasha Guddida joogtaddu & iyo Anshaxu kulamo xog-waraysi la yeesheen warbixino kala duwana ka dhagaysteen

masuuliyiinta Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Madaxa-banaan ee Qaranka Qaar ka mida intii Fasaxa lagu jiray oo kala ah: -

1. Wasiir Ku-xigeenku Wasaarada Ganacsiga
2. Wasiirka Wasaarada Caafimaadka
3. Wasiirka Wasaarada Deegaanka
4. Hay'adda Aaga Cashuuraha ka Caagan (Free zone Authority)
5. Wasiirka Arrimaha Gudaha
6. Taliyaha Ciidanka Booliiska.
7. Laba Xisbi Mucaarad ee Waddani iyo UCID

## Gudidda Daba-galka iyo Illaalinta Hantida Qaranka

Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee Golaha Wakiiladdu, waxay kulamo shaqo la yeelatay Hay'addaha Dawlada ee kala duwan, iyaddoo gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga ah ee ku salaysan Dagabalka iyo la xisaabtanka Waaxaha Dawladda, waxay kulamo shaqo la yeelatay Hay'addahan kala ah:-

- **Kulankii 1aad oo ku taariikhaysnaa 15/05/2022** waxa Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku kulan xog-waraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda iyo saraakiisha kale ee la shaqeeya Wasiirka Maaliyadda, u jeedada kulankan oo daarnaa laba dhaqangelinta soo jeedimihii ka soo baxay xisaab xidhkii 2020, iyaddoo wixii faah-faahin Guddidu la wadaagi doonto Gole Weynaha.

- **Kulankii 2aad oo ku taariikhaysnaa 08/06/2022** waxay Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku kulan shaqo la yeelatay Guddoomiyaha Banka Dhexe ee Somaliland iyo saraakiil wehelinaysay, iyaddoo u jeedada kulan oo ahaa u kuurgalida shaqada Bodhka Banka iyo xisaabaha iyo warbixinaha kale ee Banka oo Golaha ka raagay, taasi oo wixii kulankaa ka soo baxay ay Guddidu Golaha la wadaagi doonaan.
- 
- **Kulankii 3aad oo ku taariikhaysnaa 08/06/2022** waxay Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku kulan shaqo la yeelatay Hay'adda u Diyaar Garawga Aafooyinka iyo Kaydka Raashinka Qaranka ee NADFOR, iyaddoo u jeedadu ahayd u kuurgelida Xaalada Abaaraha iyo Raashinka Qaybta, maadaama oo dalka ay ka jireen abaaro ba'an, iyaddoo Guddidu wixii faah-faahin ah ay Golaha la wadaagi doonto.

- **Kulankii 4aad oo ku taariikhaysnaa 12/06/2022** waxay Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku kulan shaqo la yeelatay Hay'adda Shaqaalaha Dawlada, u jeedada kulankan oo ahaa xog-waran masuuliyada hay'adda, iyaddoo Guddidu wixii faah-faahin kulankaa ku saabsan ay ku jiri doonto warbixinta Guddida ee Guddiyada Golaha.

- **Kulankii 5aad oo ku taariikhaysnaa 20/06/2022** waxay Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku kulan shaqo la yeelatay Wasiirka Dhalinyarada iyo Ciyaaraha,

kulankan oo u jeedadiisu ahayd xogogaal u noqoshada xaalada dhalinyarada iyo ciyaaraha, maadaama oo ay Wasaaraddu Qaranka uga masuul tahay, iyaddoo wixii faah-faahin ah Guddidu la wadaagi doonta Golaha.

- **Kulankii 6aad oo ku taariikhaysnaa 21/06/2022** waxay Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku kulan shaqo la yeelatay Hay'adda Barakacayaasha iyo Qaxoontiga Qaranka, kulankaas oo ku bilaabmay jawi aan ku haboonayn inuu sii socdo, sidaasna lagu baajiyey.

## Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

**16 iyo 17 June 2022** Gudida Garsoorka Cadaalada, Shuruucda iyo Xuquuqda Aadamaha ee Golaha Wakiillada JSL waxay qabtay kulan hawleed socday mudo laba maalmood ah kasoo lagu Lafa-guraayey Qabyo-Qoraalka Xeerka Qaxoontiga iyo Magan-galyo-doonka JSL oo ay Haa'yadda Qoxoontiga iyo Barakacayaashu Golaha u soo gudbisay. Kulanku intii u socday waxa si balaadhan loogu falaqeeyey loogana dooday mashruuc sharciga Qaxoontiga iyo Magan-galyo-doonka kasoo Muhiimad wayn ugu fadhiya Qaran Jsl.

## Guddida Arr. Dibadda, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga

- **Axad 03/07/2022** Guddida Siyaasadda Arrimaha Dibedda, Iskaashiga Caalamiga ah, Qorshaynta Qaranka iyo Maalgashiga ee Golaha Wakiillada JSL waxay kulan xog-waraysi ah la yeesheen Wasiirka iyo Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga caalamiga ah mudane **Ciise Kayd Maxamuud** iyo mudane **Abdinaasir Cumar Jaamac.**

- Wakiilka Somaliland ee Dalka Uganda **Amb. Hamse Haji Dool** ayaa magaalada Kampala ku so dhaweeyay wafti uu hugaaminayo **Xildhibaan Qasim Aadan Saleebaan** oo ka tirsan Guddida Arrimaha Debadda, Iskaashiga Caalamiga, Qorshaynta Qaranka iyo Maalgashiga ee Golaha Wakiiladda **JS**L iyo Lataliyaha gudida Arimaha debeda Mudane Olol Yassin Ahmed oo hawlo shaqo u yimid dalkaas:

- Taariikhdu markay ahayd **Salaasa 26 July 2022**, waxaa kulan laba geesood ah uu ku dhex maray Magaalada Kampala ee dalka Uganda, Xubno ka socda Parliament ka wadanka Uganda oo ay hugaaminayso Gudoomiyaha Gudida Arimaha Debada ee Baarlamanka Uganda Hon. Bigirwa Norah Nyendworha, halka Dalka Somaliland uu hugaaminayo **Hon. Qasim Adam Saleebaan** oo ka tirsan Gudida Arimaha Debedda Golaha Wakiiladda Jamhuriyadda Somaliland.

## Gudiyadii Gaarka ahaa Kal-fadhigii 2aad la saaray

Intii lagu jiray Kal-fadhigii 3aad ee Golaha Wakiillada 5aad, wuxuu Gudoonka Goluhu magacaabay laba Gudi oo gaar ah (ad hoc committees), kuwaas oo kala ahaa: -

1. Gudi gaar ah oo loo saaray inay ka soo shaqayso Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Cashuuriga Barriga oo Goluhu u baahday in dib loo soo naaqisho.

## WAX-QABADKA QAYBTA MAAMULKA

### Aqoon-korodhsiyadii loo Qabtay Mudanayaasha & Shaqaalaha

- **21 June 2022,** Gudoomiyaha Golaha Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed ayaa furay kulan aqoon korodhsi (workshop) hal maalin socday oo loo qabtay Mudanayaasha Guddida Arrimaha Gudaha, Amniga iyo Difaaca, ujeedkiisuna ahayd xoojinta doorka Baarlamaanka ee kormeerka hay'addaha Qaranka ee qaabilsan amniga.
  .
- **19 July 2022,** Tabarbar aqoon korodhsi ah aaya loo qabtay Xoghaymaha Gudiyadda Golaha, Tababarkaas oo socday laba maalmood wuxuu ku sabaasan Habka Xeerarka iyo xeer-hoosaadyada loo sameeyo, iyadoo lagu qabtay Xarunta Golaha ayna soo qaban-qaabisay **Ha'ayadda Adam Smith.**

- **23 July 2022 waxa** Xildhibaanada Golaha Wakiilada loo qabtay kulan aqoon iswaydaarsi, kulankaas oo uu furay Gudoomiyaha Golaha Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed, kulankaas aqoon korodhsiga ah waxa soo qaban qaabisay Hay'adda UNDP wuxuu ku saabsanaa shaqada iyo waajibaadyada Golaha Wakiilada, kulankaas oo socday mudo laba maalmood ah wuxuu ka dhacay Hotel Casood ee Magaalada Hargeysa.

## SAFARADII DALKA DIBADDIISA

- **Wafti XIldhibaano oo Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad hogaaminayo oo u safray Dalka Ingiriiska.**

**Bishii July** Wafti uu Hogaaminayay **Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiilada Md. Siciid** Mire ayaa safar ku tagay Dalka boqortooyada Ingriiska, waftigan oo ka koobnaa Gudoomiyaha iyo 5 Xildhibaan oo kala ahaa:-

1. Xildhibaan Abubakar Siciid Cali
2. Xildhibaan Maxamed Xuseen Jaamac
3. Xildhibaan Xasan Saleban Dhuxul
4. Xildhibaan C/laahi Sh. Muxumed Axmed
5. Xildhibaan Maxamuud C/laahi Jaama

- **Wafti ka kooban Xildhibaano iyo Xoghayaha Guud oo u baxay Dalka Kenya.**

**06 August 2022** Wafti ka kooban Xildhibaano & Xoghayaha guud ee Golaha Wakiilada & hal Lataliye ayaa Safar ugu baxay Dalka Kenya, iyadoo waftigaas ay dalka Kenya ku soo dhoweeyeen masuuliyiinta Safaarada Somaliland ee Dalka Kenya.

- **Xildhibaan Guuleed Maxamed oo Dalka UAE kaga qayb-galay Shir-wayne Carbeed.**

**Xildhibaan Guuleed M. Warsame** Waxa uu **07-11 August 2022** Magaalada Shaariqa ee Wadanka Emaaraadka Carabta kaga qayb Galay shir ay soo qaban-qaabisey Jaamacada Carabta Qeybteeda "Ururka Horumarinta Maamulka (Arab Administrative Development Organization (ARADO).

Xildhibaan oo Shirkaas ku matalayay guud ahaan dawlada Somalilang gaar ahaan Baarlamaanka waxa ka soo qayb-galay masuuliyiin iyo madax ka kala socday Dalalka ka tirsan midawga Jaamacada Carabta.

## WUFUUDIHII IYO MADAXDII KALE EE GOLUHU LA KULMAY

- **Wafti ka socday Crisis Group oo Gudoomiyaha Goluhu la kulmay**

Gudoomiyaha **Golaha Wakiilada Md. Cabdirisaaq Khaliif Axmed** ayaa xafiiskiisa ku qaabilay **08 July 2022** wafti ka socda **Crisis Group,** oo Somaliland Booqosho Kujooga, waxaana kulankaas Gudoomiyaha ku weheliyay La-taliyaha Arrimaha Dibada Mr. Xasan Xiis.



Ujeedada guud ee booqashadooda **Crisis Group** Somaliland ku ymaadeen waxa ay ahayd xogdoon iyo xog-ururin xaaladda guud ee siyaasadeed, bulsho iyo

deegaameed ee dalka, xubnahaas oo kala ahaa **Omar S Mahmoud iyo Xakariya Yussuf** oo labaduba ka faallooda mandaqadda.

- **Wafti laba Xildhibaan oo ka socday Baarlamaanada Dalalka Finland iyo Sweden**

Shir-gudoonka iyo qaar ka mid ah Xildhibaanada Golaha ayaa **23 July 2022** kulan la qaatay laba Xildhibaan oo ka kala socday Baarlamaanada dalalka Finland iyo Sweden, labadan Xildhibaan oo asal ahaan reer Somaliland ka soo jeeda ayaa kala ahaa Xildhibaan Suldaan Siciid Ahmed oo ka tirsan barlamanka dalka Finland islamarkaana ah ergeyga gaarka ah ee Finland u qaabilsan dhexdhexaadinta nabada geeska afrika iyo Xildhibaan Mubaarik Abdirahman oo ka tirsan barlamanka Sweden. Ujeedada kulanka ayaa ahaa khibrad is weydaarsi iyo isku xidhka Barlamaanada dalalkooda iyo kan Somaliland.



*SHir-gudoonka, qaar ka mid ah Xildhibaanada iyo SHaqaalaha G/Wakiilada JSL iyo Labad Xildhibaan oo ka socda Sweden iyo Finland*

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**